Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Hirshabeelle
Xafiiska Madaxweynaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
حكومة إقليم هير شبيلي
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
Hirshabelle State
Office of the President

**Ref: DGHSH/XMM/225/018** **Tr: 23/10/2018**

## XEER MADAXWEYNE Lr 007

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeele

**Markii uu arkay**: qodobka 51aad farqadiisa 12aad ee Dastuurka Dowlad Goboleedka Hirshabeele.

**Markii uu arkay**: baahida loo qabo in la helo sharci iyo xeer lagu Maamulo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlad Goboleedka Hirshabeele.

**Markii uu arkay:** qaraarka baarlamaanka uu soo saaray 21/10/2018 ee uu tirsigiisu yahay **GSHDDGHSH/007/18**

Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeele waxa uu xeeriyey in qaraarka baarlamaanka ee

1. Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlad Goboleedka Hirshabeele.

loo bedelo xeer madaxweyne maanta oo ay taariikhda tahay 23/10/2018
xeer lamber_________

**Maxamed Cabdi Waare**
**Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabeele**

Jowhar, Hirshabelle State of Somalia. Tel: +252-616-652530 Email: president@hirshabelle.gov.so

Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Hirshabelle
afiiska Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad Goboledka Hirshabeelle

جمهورية الصومال الفيدرالية
ولايةاقليم هرشبيلي
مكتب رئيس مجلس النواب هرشبيلي

**Federal Republic of Somalia**
**Hirshabelle State**
**Office of the speaker**

---

Ref: DGHSH /XGB/ 177/18: الرقم                                                    Jowhar, 21th October 21, 2018 التاريخ

**Ku: Madaxweynaha Dowlad Goboledka Hirshabelle** =Jowhar=

**OG: Madaxweyne Kuxigenka Dowlad Goboledka Hirshabelle** =Jowhar=

**OG: Wasiirka Shaqada iyo arrimaha Bulshada DG Hirshabelle** =Jowhar=

**OG:Guddiga Shaqada iyo Shaqalaha BDGHSH** =Jowhar=

**OG:Xoghayaha Guud ee Golaha Sharci Dejeinta Hirshabelle** =Jowhar=

**Ujeedo :-ANSIXINTA SHARCIGA shaqalaha rayidka DG Hirshabelle 2018 (Sharci lamber 7)**

**Mudane Madaxweyne**

Waxaan kugu wargelinayaa inuu Golaha sharci dejinta Dowlad Goboledka Hirshabelle go'aan ka gaaray Ansixinta Hindise sharciyeedka Shaqalaha Rayidka Hirshabelle oo halkaan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Kalfadhigii 4aad Fadhigiisa 18aad Taarikhdu marka ay aheyd 21/oktober/2018 oo kadhacay Xaruntiisa Kumeel gaarka ee ku taala Caasimada Hirshabelle ee Jowhar ku ansixiyey Cod Furan oo u dhacay sida hoos kuxusan.

| | |
|---|---|
| **Xildhibaanada Oggolaaday :** | **56 (konton iyo lix) Xildhibaan** |
| **Xildhibaanada Diiday:** | **(0) Xildhibaan** |
| **Xildhibaanada ka aamusay:** | **(0) Xildhibaan** |

Hadaba Waxaan Mudane Madaxweyne kaa codsanayaa inaad Xeer Madaxweyne ku Oggolaato **Sharciga shaqaalaha rayidka DG hirshabelle** (Sharci Lr.007) Si Waafaqsan qodobka 51aad Faqrada 12aad Dastuurka DGHSH Laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dowlad Goboledka Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 43aad Faqrada 1aad si uu u noqoto Sharci dhaqan gal ah.

**Sheikh Osman Barre Mohamed**

**Gudomiyaha Golaha Sharci Dejinta Dowlada Goboleedka Hirshabelle**

E-mail: office.speaker@hirshabellestate.so | Mobile: +252615564141/ +252615611016

Qaraarka Golaha Sharci Dejinta Hirshabelle

Tix:DGHSH/GSHDJ/018/18 21$^{ka}$ October 2018

DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABELLE.

GOLAHA SHARCI DEJINTA DOWLAD GOBOLEEDKA HIRHSABELLE

QARAAR KUSAABSAN

**Ansixinta Sharci Lr.7 ee Shaqalaha Rayidka Dowlad Goboledka Hirshabelle**

JOWHAR 21,October ,2018

**Baarlamanka Dowlad Goboledka Hirshabelle**

**Markuu arkay:** Qodobka 34aad Faqradiisa 1aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabelle.

**Markuu arkay:** Qodobka 28aad Faqradiisa 1aad & 2aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabbele.

**Markuu arkay:** Qodobka 33aad Faqradiisa 1aad ee Xeer Hoosadka Baarlamanka Dowlad Goboledka Hirshabelle.

**Markuu arkay:** Warqada Madaxweyne Dowlad Goboledka Hirshabelle tirsigeedu yahay DGHSH/XMM/N/0168/018 ee 15/08/2018 oo kusaabsan in la ansixiyo Hindise sharciyeedka Magaciisu kor kuxusan si shaqo Abuur loogu sameeyo Bulshada Hirshabelle loona helo shaqaalo tayo leh oo ka howlgala Xafiisyada Hay'adaha Dowlada loona helo sharciga shaqaalaha Rayidka Dowlad Goboledka Hirshabelle.

**Markuu Dhageystay :** Warbixinta Guddiga shaqada shaqaalah Dhalinyarada iyo Isbortiga Baarlamanka Hirshabelle oo kusaabsaneyd falanqeynta Hindise sharciyedkan oo ku taariikhsan 21-10-2018.

**. GOLUHU WUXUU GUDDOONSADAY QODDOBADA HOOS KUXUSAN;**

**Qodobka 1aad**

Si waafaqsan Qodobka 33aad ee xeer hoosaadka Golaha sharci Dejinta oo xeerinayo Habraaca Ansixinta Sharciyada

Golaha Sharci Dejinta Kalfadhigii 4aad kulankiisa 18aad ee 21ka oktober 2018 oo ay goobjoog yihiin **56** Xildhibaan codeynaya waxay Hindise sharciyedka Shaqalaha Rayidka Hirshabelle (Sharci Lr.007) ku ansixiyeen Cod furan:

| | |
|---|---|
| Oggol: | 56 (konton iyo lix Xildhibaan) |
| Diiday: | 0 ( Xildhibaan) |
| Ka Aamustay: | 0 ( Xildhibaan ) |

**JOWHAR 21,October ,2018**

## Qodobka 2aad

**Meel Marinta Sharciga Lr.007 Shaqaalaha Rayidka DG Hirshabelle**

Qaraarka Golaha oo ay kulifaaqan yihiin Dhamaan Dokumentiga kor kuxusan oo ah qayb qaraarkan kamid ah waxaa lagu soo saaraya xeer Madaxweyne Dowlad Goboledka Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 51aad Faqrada 12aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabelle waxaana lagu soo saaraya faafinta Rasmiga ah ee Hirshabelle si waafaqsan Qodobka 43aad Faqrada 1aad ee Dastuurka Dowlad Goboledka Hirshabelle

## Lifaaqyada:

- **Warqada Madaxweynaha Dowlad Goboledka Hirshabelle Lr. DGHSH/XMM/N/00168/018 ee 15-08-2018**
- **Warqada Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada Hirshabelle Ref.W/sh/sh/DGHSHS/2018 ee 06/08/2018**
- **Warbixinta Guddiga Shaqada iyo shaqada iyo shaqaalaha Dhalinyarada iyo Isbortiska Baarlamanka oo kusaabsaneyd falanqeynta Hindise sharciyedkan oo ku taariikhsan 21-10-2018.**

**M.ne Sh. Cusmaan Bare Maxamed**

**Gudoomiyaha Golaha Sharci Dejinta DGHSH.**

---------------------------

**Ansixinta Sharci Lr.007 ee Shaqaalaha Rayidka DG Hirshabelle oo uu soo Gudbiyey Wasiirka shaqada iyo Arrimaha Bulshada.**

| **Guddoomiyaha Golaha Sharci Dejinta Dowlad Goboledka Hirshabelle** | |
|---|---|
| Tirada Xubnahada Codeysay 56: Oggol(56) Diidmo(0) Ka aamustay(0) | |
| **Guddoomiyaha Golaha Sharci Dejinta**<br><br>Saxiixa Md.ne Sheikh Cusmaan Barre Mohamed | Taariikh 21th Oktober 2018 |

**JOWHAR 21,October ,2018**

Jamhuuriyada Federalka Soomaaliya

Dowlad Goboleedka Hirshabeelle
Xafiiska Madaxweynaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
حكومة إقليم هير شبيلي
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
Hirshabelle State
Office of the President

Ref: Ref: DGHSH/XMM/N/0168/18 Tr: 15/8/2018

Ku: Guddoomiyaha Baarlamaanka Hirshabelle State Jowhar

Og. Gudd/ ku xigeenka 1aad Baarlamaanka Hirshabelle State Jowhar

Og. Gudd/ ku xigeenka 2aad Baarlamaanka Hirshabelle State Jowhar

Og. Madaxweyne ku xigeenka Dowladda Hirshabelle State Jowhar

**UJEEDO: <u>ANSAXINTA HINDISA SHARCIYEEDKA SHAQAALAHA RAYIDKA ee DG HSS</u>**

Mudane Guddoomiye waxaa Sharaf ii ah in aan kuu soo gudbiyo Nuqulka Hindisa sharciyeedka Shaqaalaha Rayidka ee DG Hirshabelle oo ay Gollaha Wasiirada Hirshabelle cod Aqlabiyad ah ku ansaxiyeen taariikhdu markay ahayd 14/08/2018.

Waxaa rajeynayaa in Mudanayaasha Baarlamaanka Dowlad Goballeedka Hirshabelle ay ansaxin doonaan Hindisa Sharciyeedkan.

Mahadsanid,

XAFIISKA MADAXWEYNAHA DOWLAD GOBOLEEDKA HIRSHABEELLE
مكتب الرئيس
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Mudane: Maxamed Cabdi Waare**

**Madaxweynaha Dowlad Goballeedka Hirshabelle ee Soomaaliya**

Jowhar, Hirshabelle State of Somalia. Tel +252-616652530 E-mail president@hirshabelle.gov.so

Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Dowlad-Goboleedka Hirshabelle
Vasaaradda Shaqada iyo Arimaha Bulshada
Xafiiska Wasiirka

Federal Republic of Somalia
Hirshabelle State
Ministry of Labour & Social Affairs
Office of the Minister

جمهورية الصومال الفيدرالية
حكومة اقليم هيرشبيلى
وزارة العمل والشئون الإجتماعية
مكتب الوزير

**Ref: W/Sh/Sh/DGHSHS/2018** **Date: 06/08/2018**

**Ku: Madaxweynaha Dowlad Goboleedka Hirshabelle** **Jowhar**

**Og: Madaxweyne ku Xigenka Dowlad Goboleedka Hirshabelle** **Jowhar**

**Ujeeddo: Soo Gudbin Sharciga Shaqaalaha Raydka ah ee DGHSH**

Sida caadiga ah waxa la gaaray xiligii la dar-dar geli laha Howlaha Dowlada.

Wasaarada Shaqada iyo Shaqaalaha Hirshabelle waxa ay idin horkeeneysa Sharciga Shaqaalaha Raydka Ah ee Dowlad Goboleedka Hirshabelle, sidas darted waxa aan codsanaya in ay si hufan u ansixiyaan Golaha Wasiirada Dowlad Gobaleedka Hirshabelle si aan ugu gudbiyo Golaha Baarlamaanka Dowlad Gobaleedka Hirshabelle si ay u ansixiyaan, maa daama ay wax badan ay inooga xeran yihiin.

**Mahadsaniin**

**Ahmed Abdullahi Bashir**

**Wasiirka Shaqada iyo Arimaha Bulshada Hirshabelle**

**Saxiixa:** ____________

Email:wasaaradashaqadahir@gmail.com/molehirshabelle@gmail.com/karaama570@gmail.com
Tell: +252615152823/ +252616791172

**DOWLAD-GOBOLEEDKA HIRSHABLLE EE SOOMAALIYA**

# Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

# ee

# Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya

**Oktoobar 2018**

**Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda**

**Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya**

**TUSMO**

***QAYBTA 1: GUUDMAR*** ... ***11***

1. Magaca Xeerka oo Kooban ... 11
2. Hadafka Xeerka ... 11
3. Cidda lagu maamulayo ... 11
4. Erey-bixinta ... 12

***QAYBTA 2: SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DOWLADDA*** ... ***15***

5. Mabaa'diida Hagaya ... 15
6. Jagooyinka shaqaalaha rayidka ah ee Dowladda ... 15
7. Baadi-sooca jagooyinka ... 15
8. Waajibaadka iyo mas'uuliyadaha ... 16
9. Waxyaabaha ka reeban ... 16
10. Xaq u lahaanshaha ka-mid-noqoshada Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ... 17
11. Geeddi-socodka shaqo-qorista ... 17
12. Qandaraas shaqaaleyn ... 18
13. Indho-fur ... 19
14. Muddada tijaabada ah ... 19
15. Magacaabis ku-sime ... 19

***QAYBTA 3: TABABAR IYO HORUMARIN*** ... ***20***

16. Isuduwid uu Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu Sameeyo ... 20
17. Mas'uuliyadda Hay'adda Loo Shaqeeyo ... 20
18. Hadafka laga leeyahay Tababarka iyo Kobcinta ... 20

***QAYBTA 4: SHURUUDAHA SHAQAALEYNTA*** ... ***21***

19. Qiimeynta sanadlaha ah ee shaqada qofka ... 21
20. Mushaaraadka iyo gunnooyinka ... 21
21. Fasaxyada ... 22
22. Jagooyinka Shaqaalaha Rayidka ah ee Bulshada ee ay maaliyaddoodu bixiyaan deeq-bixiyeyaal ... 23
23. Beddelaadda shaqaalaha ... 25
24. Dalacsiinta ... 25

25. Hawlgab ........ 26
26. Is-casilaad ........ 26
27. Shaqo-ka-joojinta (*Redundancies*) ........ 26
***QAYBTA 5: ANSHAX-MARIN IYO RAFCAAN........ 27***
28. Anshax-xumo ........ 27
29. Ciqaabaha Ka Dhalanaya Anshax-xumada ........ 28
30. Rafcaannada ........ 29
***QAYBTA 6: MIISAANIYADDA NAKH-SHADDA QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADEED, DHISIDDEEDA IYO SHAQAALE U SAMEYNTEEDA........ 29***
31. Qaabeynta Hay'adda ........ 29
32. Miisaaaniyad-sanadeedda ........ 29
***QAYBTA 7: qodobbo kale........ 29***
33. Xeer-nidaamiyeyaal la soo saari karo si loo fuliyo Xeerkan ........ 29
34. Xeer-dhaqan anshaxeed (*Codes of conduct*) ........ 30
35. Sarreynta Xeerkan ........ 30

# QAYBTA 1: GUUDMAR

## 1. Magaca Xeerka oo Kooban

1.1 Xeerkan waxaa loogu yeeri karaa Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Somaaliya

## 2. Hadafka Xeerka

2.1 Hadafka laga leeyahay Xeerkan waa in:

b) Qaab guud oo xeer u noqda iyo mid maamul loo sameeyo si loo helo Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed oo waxtar leh oo dhexdhexaadna ah oo ay yeelato Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya iyada oo shaqaaleynta lagu saleynayo mabaa'diida aqoonta iyo kartida qofka iyo fursad loo siman yahay..

t) In la sameeyo xeerar si guud loogu maamulo looguna qaabaynayo:

1- shaqaale Rayid ah oo Dowladeed oo siyaasad ahaan aan dhinac u xaglin oo dhexdhexaad ah;

2- shuruudaha magacaabista Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda;

3-xaaladaha shaqada;

4- xuquuqaha iyo waajibaadka shaqaalaha;

5-hab-dhaqanka shakhsiga ah; iyo

6- koboca xirfadeed ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

## 3. Cidda lagu maamulayo

3.1 Marka laga reebo sida hoos lagu cayimey, xeerkan waxaa lagu maamulayaa shaqaalaha maamulka iyo maareynta ee waqti buuxa iyo kuwa waqti gaaban shaqeeya oo mushaarkooda laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan.

3.2 Qodobbada xeerkan waxaa sidoo kale lagu maamulayaa shaqaalaha loo magacaabey jagooyin ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee maaliyaddoodu ay bixiyaan deeq-bixiyeyaal, sida ku xusan Qodobka 22aad ee Xeerkan..

**3.3 Xeerkan laguma maamulayo:**

b) xubnaha ka tirsan ciidamada booliska, ciidamada amniga, ciidamada qalabka sida

t) xubnaha garsoorka

j) saraakiisha la doortay

x) Wasiirrada, Wasiir-ku-xigeennada, wasiiru dowlayaasha iyo xubnaha Golayaasha ama Guddiyada uu magacaabo Madaxweynaha

kh) shaqaalaha sharikaadka ganacsi ee ay dowladdu leedahay oo u shaqeeya qaab ganacsi

d) shaqaalaha loo qorto Qandaraasyo Muddo Go'an socda si ay u bixiyaan adeegyo xirfadeed kuwaas oo gaar ah oo ka madax-bannaan hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

r) Shaqaalaha u shaqeeya qaab qandaraasle ay dowladdu u qaadatey in uu bixyo adeegyo.

## 4. Erey-bixinta

4.1 Xeerkan dhexdiisa, haddii xaaladdu aaney si kale ka dhigeynin fasiraadahan soo socda ayaa la raacayaa:

b)"***Guddiga Rafcaanka***" waxaa loola jeedaa hay'adda uu Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah u magacaabo in ay dhegeysato rafcaannada ka dhanka ah ciqaabaha anshax-marinta ah ama cabashooyinka ka dhasha go'aamo ay gaartey Hay'ad Loo Shaqeeyo

***t) "Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed"*** waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya Hay'ad Loo Shaqeeyo oo mushaarkiisa laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya sida ay dhigeyso faqradda 4.1e).

***j) "Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"*** waxaa loola jeedaa Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu waxaa ay si waafaqsan qodobbada xeerkan u qabtaan dhammaan hawlaha fulinta iyo kuwa maamul iyo adeeg-bixinta ee Dowladda.

***x)"Guddiga"*** waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee lagu dhisey Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.***kh) "Miisaaniyadda Mideysan"*** waxaa loola jeedaa Maaliyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaliya ee lagu qeexay Qodobka 4aad ee wareegtada lagu dhisey Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka ee Hirshabelle Soomaaliya.

***d) "Madax-Waaxeed"*** waxaa loola jeedaa waax heerkeedu gaarsiisan yahay Agaasime.

***r) "Xeer la diidi karo"***waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta *Xeer-nidaamuyuhu* dhaqangal noqon.

***s) "Jago uu Maalgeliyo Deeq-bixiye"*** waxaa loola jeedaa jago ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee uu deeq-bixiye ku bixiyo maaliyad gaar ah oo lagu daboolo kharashka mushaarka, iyada oo loo soo marinayo hannaanka lacag-bixinta ee dowladda ama si toos ah loo siinayo Qofka Shaqaalaha ah.

***sh) "Qof Shaqaale ah"*** waxaa loola jeedaa Qof Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed ah oo ay shaqaaleysatey Hay'ad Loo Shaqeeyo.

***dh) "Hay'ad Loo Shaqeeyo"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad, wakaalad ka tirsan Wasaarad, ama Guddi Madax-bannaan Dowlad-goboleedka ee Hirshabelle Soomaaliya ka mid ah oo shaqaaleysta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

***c) "Shaqaalaha"*** (*Establishment*) waxaa loola jeedaa wadarta tirada iyo darajooyinka jagooyinka maaliyad ku leh Miisaaniyadda.

***g) "Qoys"*** waxaa loola jeedaa xaas (ninka ama naagta) iyo carruurta ku tiirsan qofkaa Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

***f) "Qandaraas Muddo Go'an"*** (*Fixed-term Contract*) waxaa uu macnaheedu yahay qandraas shaqaaleyn oo qof la siiyo oo muddo cayiman oo xaddidan leh.

***q) "Dowladda"*** waxaa loola jeedaa maamulka ku meelgaarka ah ee hirshabelle Dowlad goboleedka Hirshabelle ee lagu dhisey Oggolaanshaha Dowladda Federaalka ee Soomaaliya ama Dowlad-goboleed Xubin Ka ah Federaalka oo waqtigaa ka dib la dhiso.

***k)"Dowlad-goboleedka*** Hirshabelle**"** waxaa loola jeedaa Dowlad-goboleedka Xubin ka ah Federaalka ee markaa ka dib la dhisay.

***l) "Madaxa Hay'adda Loo Shaqeynayo"*** waxaa uu macnaheedu yahay Agaasimaha Guud (Xoghayaha Joogtada ah) ee Wasaarad ama sarkaal gacanta ku haya hawlaha fulinta ee Hay'adda Loo Shaqeynayo

***m) "Tilmaammo/amarro"***waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo waxaana soo saara Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo u maraya Guddoomiyaha Guddiga. Tilmaamaha (amarrada) waxaa ay caadi ahaan ay tahay in islamarkaa ama waqti cayiman lagu fuliyo.

***n)"Maareeye"*** waxaa loola jeedaa qofka sida tooska ah uu u hoos tago Qofka ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

**w)"Xulasho aqoon iyo karti ku dhisan"** Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo lagu shaqaaleeyo laguna dalacsiiyo aqoontooda iyo kartidooda waxaa uu macnaheedu yahay in:

> 1-dhammaan xubnaha bulshada ka mid ah ee xaq u leh oo la siiyo fursad caqligal ah oo ay ku soo codsadaan in ay qabtaan hawlaha u habboon;
>
> 2-loo kuurgalo sida ay kuwa soo codsadey uga soo bixi karaan hawlaha u habboon shaqada;
>
> 3-u-kuurgeliddaas sal looga dhigo sida ay aqoonta iyo kartida qofka shaqada soo codsadey iyo aqoonta iyo kartida caadi ahaan loogu baahan yahay hawsha; iyo
>
> 4-loo kuurgalo sida ilaa xad uu qofku ugu habboon yahay shaqada oo noqota arrinta aasaasi ahaan lagu saleynayo go'aanka la qaadanayo..

***h)"Wasiir"*** waxaa loola jeedaa xubin ka mid ah Golaha Wasiirrada

***b) "Wasaarad"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad ka mid ah Laanta Fulinta ee la dhi sey iyada oo la raacayo dastuurka Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya.

***t) "Qandaraas ay muddadiisu furan tahay"*** waxaa loola jeedaa qodaraas shaqaale oo qoran oo aan lahayn taariikh go'an oo uu dhammaanayo.

***j)"Guddiga Shaqo-qorista"*** waxaa loola jeedaa guddi uu Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda uu u dhisey in uu dib u eego codsiyada, ay musharaxiinta soo codsadey ka qaadaan wareysi/imtixaan afka ah ayna talo ku soo jeediyaan musharaxa ugu habboon ee ay tahay in loo qaato jagada ka bannaan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

***x) "Xeer-nidaamiye"***waa *xeer la diidi karo* oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerkan. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka**.**

***kh) "Mushaar"*** waxaa loola jeedaa ujuurada Qofka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda la siinayo iyada oo looga beddelanayo hawsha uu qabtey.

# QAYBTA 2: SHAQAALAHA RAYIDKA AH EE DOWLADDA

## 5. Mabaa'diida Hagaya

5.1 Sida uu dhigayo Dastuurka Dowlad-goboleedka, Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa hagaya mabaa'diida naxariista, daah-furnaanta, bulsho-u-adeegga, iyo ixtiraamidda ku kala-dambeynta maamulka, daacadnimada, sirnimada, anshax hawleed, hufnaanta, waxtarka, xirfadlenimo, xaq ku shaqeyn, sinnaan iyo hababka ugu wanaagsan ee hawlqabadka.

5.2 Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda waa in ay u shaqeeyaan si waafaqsan mabaa'diidan marka ay la tacaamulayaan saraakiisha la soo doortey, Shaqaalaha Rayidka ah ee ay wada shaqeeyaan, iyo xubnaha ka tirsan dadweynaha.

5.3 Saraakiisha la soo doortey waa in ay u dhaqmaan si waafaqsan mabaa'diidan marka ay la tacaamulayaan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

5.4 Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa shaqada lagu qoraa si ku saleysan aqoontooda iyo waayo-aragnimadooda ka dib marka ay ku soo baxaan habraacyada soo xulidda ee uu dhigayo sharcigan iyo xeerarka iyo dhabbe-tusayaasha la xiriira.

## 6. Jagooyinka shaqaalaha rayidka ah ee Dowladda

6.1 Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa ay ku fadhiyaan jagooyin la sameeyey oo maaliyaddooda ay ka timaaddo Miisaaniyadda. Wadarta tirada jagooyinka maaliyaddooda laga bixiyo Miisaaniyada ayaa ah shaqaalaha (*establishment*) Hay'adda Loo Shaqeeyo.

6.2 Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed waxaa loo magacaabi karaa, loo dhiibi karaa, loo beddeli karaa ama loo dalacsiin karaa keliya boos ka bannaan shaqaalaha si waafaqsan qodobbada 11, 12, 23 iyo 24.

6.3 Shaqaalaha Dowladda waxaa loo magacaabaa (la siiyaa) Qandaraasyo Aan Muddadooda Xaddidneyn, haddii Qodobka 22aad ee Xeerkan uusaan beddelkeeda sheegin.

6.4 Jago kasta oo ka mid ah shaqaalaha waxaa ay yeelaneysaa lambar jago iyo tilmaanta shaqada oo sheegeysa waajibaadka ay tahay in laga soo baxo iyo shuruudaha waxbarashada/aqoonta, xirfadeed iyo waayo-aragnimo ee looga baahan yahay jagada. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee dowladda ayaa ka mas'uul ah ansaxinta iyo haynta xogta dhammaan jagooyinka jira.

## 7. Baadi-sooca jagooyinka

7.1 Jagooyinka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa loo kala saaraa darajooyin waaafaqsan nooca shaqada, heerka mas'uuliyadda, iyo aqoonta waxbarasho, xirfadaha iyo waayo-aragnimada loogu baahan yahay ka soo bixidda hawlaha.

7.2 Qaab-dhismeedka iyo mushaarka Heerka Darajada ee loo ansaxiyey darajo kasta waxaa xeer-nidaamiye ka soo saaro Guddiga Shaqaalaha Rayidkaah ee Dowladda.

Intii isku darajo ahba isku mushaar ayaa ay qaadanayaan guud ahaan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

7.3 Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa loogu beddeli karaa jago kale oo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ka mid ah si waafaqsan shuruucda ay dhigayaan Qodobbada 23aad iyo 24aad ee Xeerkan.

## 8. Waajibaadka iyo mas'uuliyadaha

8.1 Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay waajibaadkooda uga soo baxaan si waafaqsan sharciga dowlad-goboleedka Hirshabelle iyo danta dadweynaha. Waa in ay:

b) hawshooda ku bixiyaan dadaalka uu u baahan yahay xafiiska iyaga oo aan daahin,

t) shaqada yimaadaan waqtigii loogu talogaley iyo waqtigii ku habboonaa,

j) ilaaliyaan sirnimada iyo amniga macluumaadka ay helaan inta ay gudanayaan waajibkooda.

x) Raacaan xeerarka iyo xeer-nidaamiyeyaasha lagu maamulayo hawshooda.

8.2 Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa ay u leeyihiin in ay ka mid noqdaan xisbiyo siyaasadeed iyo ururro siyaasadeed oo kale laakiin waa in ay ka fogaadaan in ay si firfircoon ugu lug yeeshaan hawl ama hoggaan xisbi ama dhaqdhaqaaq siyaasadeed.

8.3 Shaqaalaha rayidka ah ee dowladda waxaa ay ka mid noqon karaan ururro shaqaale.

8.4 Saacadaha shaqada ee caadiga ah ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa **36 saacadood** toddobaadkii oo lagu qabto muddo lix maalmood ah, laga bilaabo Sabti ilaa Khamiis. Saacada shaqada ee maalintii la shaqeeyo waxaa Hay'ad kasta oo Loo shaqeeyo ay u dejineysaa hadba sida lagamamaarmaanka u ah waajibaadka hay'addaa

8.5 Hay'ad Loo Shaqeeyo oo kasta waxaa ay dejin kartaa siyaasado iyo habraacyo shaqaale oo gaar u ah hawsheeda, waase haddii aaney ka hor imaaneynin qodobbada Xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaasha ama amaradda uu soo saaro Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

## 9. Waxyaabaha ka reeban

9.1 Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in aaney ku lug yeelan fal kasta oo aan u habbooneyn mas'uuliyadahooda ka Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed ahaan.

9.2 Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda waa in aaney:

b) Ku lug yeelan shaqo kale, marka laga reebo haddii shaqadaasi uu oggolaadey Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo waana in markaa aaney carqaladeyn sida ay waajibaadkooda u gudanayaan.

t) Shaacin (faafin) ama sababin in la shaaciyo (faafiyo) wax kasta oo ku saabsan hawlaha maamulka dowladda, ama waa in aaney bixin hadal dadweynaha loogu

talogaley oo ku saabsan siyaasadda maamulka dowlada marka laga reebo marka ay taasi qayb ka tahay hawshooda rasmiga ah ee caadiga ah ama marka ay oggolaansho ka helaan Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo.

j) Ku lug yeelan ganacsi ishaafalato ah ama maalgelin kasta oo ay u badan tahay in ay saameyn ku yeelato ka-soo-bixidda waajibaadkooda rasmiga ah.

x) Oggolaan ama weydiisan haddiyado mood ama nool, axsaan nooca uu doono ha ahaadee, ama abaalmarin cid ka tirsan ama dibadda ka ah hay'addooda iyaga oo dhaafsanaya hawlaha adeegga bulshada ah ee ay hayaan, ama sharikadaha ganacsiga ama shakhsiyaad la ganacsada ama ganacsi ka doonaya Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaalya ama mid ka mid ah Wasaaradahiisa ama hay'adiisa.

kh) Ku takri falin kheyraadka/xoolaha, macluumaadka ama awooddooda u adeegsan dan gaar ah ama uga faa'ideyn qof kale si xad gudub ama ku-tumasho ku ah sharciga.

## QAYBTA 3: SHAQO-QORISTA

### 10. Xaq u lahaanshaha ka-mid-noqoshada Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

10.1 Ka-mid-noqoshada Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa ay u furan tahay qof kasta oo ah muwaadin hirshabelle Soomaaliyeed oo ugu yaraan 18 16sano jir ah.

10.2 Kuwa soo codsada in ay ka mid noqdaan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in uu caafimaadkoodu wanaagsan yahay oo aaney qabin cudur ama naafanimo ka hor-istaageysa gudashada waajibaadka jagadaas. Musharaxiinta shaqada loo qaadan rabo waxaa looga baahan karaa in ay maraan baaris caafimaad ka hor inta aaney saxiixin qandaraaska shaqaaleynta.

10.3 Qofka soo codsada shaqo oo horey loogu heley, ka dib markii waddo caddaalad ah loo marey, dembi ay ciqaabtiisu tahay xabsi **lix (6) bilood** ama ka badan ah xaq uma laha in loo qaato jago ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Musharaxa loo xushey in loo qaato shaqo waa in uu bixiyaa caddeyn tilmaameysa in aanu dembi soo gelin ka hor intii aanu saxiixin qadaraaska shaqaaleynta

10.4 Musharax loo soo xuley in loo qaato shaqo waxaa looga baahan karaa in baaritaan dhinaca amniga ah ay ku sameyso hay'ad u habboon ka hor inta aanu saxiixin qandaraas shaqaaleyn.

### 11. Geeddi-socodka shaqo-qorista

11.1 Xubnaha Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in shaqada loogu qaataa tartan furan oo loo qabtey si waafaqsan Xeer-nidaamiyeyaasha uu u dejiyey Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Shaqo u qaadashada aan raacin xeerarka iyo habraacyada loo dejiyey waa waxba kama jiraan.

11.2 Shaqaale u qaadashada jagooyinka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxa sameynaya Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

11.3 Madaxa Hay'adda ama wasaaradda Loo Shaqeeyo ayaa soo ogeysiinaya Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda marka ay jirto baahi ku aaddan jago ama jagooyin bannaan oo la doonayo in la buuxiyo. Ka-hor inta uusan bilaabin tallaabada shaqaale-qorista, Guddigu waxaa uu hubsanayaa in ay jirto jago bannaan oo maaliyad loogu talogaley ay ku jirto miisaaniyadda. Tallaabadan shaqaale-qorista waxaa lagu saleynayaa Tilmaanta Shaqada ee Qoran iyo Darajada jagada ee uu ansaxiyey Guddiga.

11.4 Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu hubinayaa in dhammaan soo-codsadayaasha u qalma jagada la siiyo fursad ay ku soo codsadaan looguna tixgeliyo jagooyinka bannaan, iyo in shaqo-u-qaadashada lagu saleeyo aqoonta, waayo-aragnimada iyo kartida qofka si aan loo sameyn dhinac u xaglin, eex ama qaraabo-kiil.

11.5 Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa dhisaya Guddi Shaqaaleyn oo eega araajida oo talooyin ka bixiya cidda loo qaadanayo jagada bannaan. Guddi Shaqaaleyn ayaa isla hal waqti ka shaqeyn kara hal shaqo ama shaqooyin badan oo bannaan

11.6 **Xeer-nidaamiyeyaal** faahfaahsan oo ay tahay in ay raacaan Hay'adda Loo Shaqeynayo, Guddiga Shaqo-qorista iyo Guddiga oo ku saabsan shaqo-qorista, magacaabista (shaqo-u-qaadashada) iyo dalacsiinta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa sida uu waajibinayo Xeerkan, waxaa soo saaraya Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

## 12. Qandaraas shaqaaleyn

12.1 Musharaxiinta ku guuleysta tartanka shaqada ayaa qoraal ahaan loogu bandhigayaa shaqada; qoraalkaas oo sheegaya waxa ay tahay jagada, mushaarkeeda iyo shuruudaha shaqaaleynta.

12.2 Shaqaalaha Shaqada loo qaato waa in ay saxiixaan qandaraas shaqaaleyn oo dhigaya shuruudihii lagu sharxay waraaqda shaqo-u-qaadashada. Xubinta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in la siiyaa nuqul ka mid ah qandaraaskiisa/keeda.

12.3 Dhammaan Shaqaalaha waa in ay, marka shaqada loo qaato, Guddiga u soo gudbiyaan ayna u diyaariyaan nuqullo la xaqiijiyey oo shahaadooyinka waxbarashada iyo kuwa xirfadeed ah ee ay haystaan. Nuqullada dhammaan shahaadooyinka waa in lagu hayaa galka shakhsiga ah ee qofka Shaqaalaha ah. Guddiga ayaa ka mas'uul ah in uu qaado tallaabooyinka ku habboon ee uu ku xaqiijinayo runnimada shahaadooyinka iyo aqoonta ay sheegtaan musharaxiinta si shaqada loogu qaato.

Qofka ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee lagu helo in uu bixiyey macluumaad aan sax ahayn oo ku saabsan aqoonta uu leeyahay ama shahaadooyin been-abuur ah waxaa laga cayrinayaa shaqada.

12.4 Dhammaan Shaqaalaha waa in ay, marka shaqada loo qaato, maraan dhaartan hoose:

"Waxaan ku dhaaranayaa Magaca Ilaahay in aan raacayo una hoggaansanaanayo shuruucda Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya, in aan si buuxda u hirgelinayo mabaa'diida guud ee Dowladda iyo in aan si dadaal uu ku dheehan yahay u qaban doono ugana soo bixi doono waajibaadkeyga sida uu sharcigu farayo."

## 13. Indho-fur

13.1 Shaqaalaha cusub ee loo qaato Shaqada Dowladda waa in qaataan Barnaamijka Tababarka Indho-furka ah bisha ugu horreysa ee shaqada gudaheeda. **Xeer-nidaamiyeyaal** loogu talogaley hagidda Indho-furka ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa waxaa soo saaraya Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

## 14. Muddada tijaabada ah

14.1 Shaqaalaha cusub ee loo qaato in ay ka mid noqdaan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa ay mari doonaan muddo sodon(30) maalmood oo tijaabo ah. **Xeer-nidaamiyeyaal** loo marayo sida loo eegayo hawl-qabadka qofka ee muddada tijaabada ayaa uu soo saari doonaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

14.2 Haddii ay dhacdo in qandaraaska shaqaalenimada loo joojiyo qofka oo si dad ku filan shaqada uga soo bixi waayo inta lagu jiro ama dhammaadka muddada tijaabada, Qofka Shaqaalaha ah waa in la siiyaa mushaarka maalmihii uu shaqeeyey.

14.3 Qofka shaqaalaha ah ee si lagu qanco u dhammeysta tijaabada waa in loo xaqiijiyaa jagada laga bilaabo taariikhda maalinta uu dhammeystey muddada tijaabada. Xaqiijinta shaqada waa in iyada oo qoraal ah uu Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu u diraa Qofka Shaqaalaha ah iyo Hay'adda Shaqaaleyneysa.

## 15. Magacaabis ku-sime

15.1 Marka qof shaqaale ah, oo aan ahayn Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo, uu awoodi waayo in uu waajibaadkiisa guto ama uu ku maqan yahay fasax ama waxbarasho, markaa Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo ayaa codsan kara in Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu u oggolaado in uu magacaabo qof shaqaale ah oo leh aqoontii iyo kartidii loo baahnaa oo ku-sime-ahaan u haya jagadaas ilaa qofkii hayey shaqadaas uu ka soo noqdo ama uu ka awoodo in uu guto waajibaadkiisii.

15.2 Marka Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo uu awoodi waayo in uu waajibaadkiisa guto ama uu ku maqan yahay fasax ama waxbarasho, Wasiirka ayaa codsan kara in Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu u oggolaado in uu magacaabo qof shaqaale ah oo leh aqoontii iyo kartidii loo baahnaa oo ku-sime-ahaan u haya jagadaas ilaa qofkii hayey shaqadaas uu ka soo noqdo ama uu ka awoodo in uu guto waajibaadkiisii.

15.3 Qofka shaqaalaha ah ee jago u haya ku-sime ahaan si waafaqsan faqradda 15.1 iyo 15.2 waxaa uu jagadaas ku-sime ahaan u hayn karaa muddo aan ka badneyn lix (6) bilood, marka uu qoraal ku ansaxiyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ma ahee.

15.4 Marka ay dhacdo in ay jago bannaanaato is-casilaad, hawlgabnimo, beddelaad ama dallacaad daraaddeed, Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo ayaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ka codsan kara in uu u oggolaado in uu u magacaabo qof shaqaale ah oo leh aqoontii iyo kartidii loo baahnaa oo ku-sime ahaan shaqada u haya ilaa laga qorayo qof buuxiya jagada bannaanatey iyada oo taas loo marayo geeddi-socod shaqaaleyn oo ku dhisan karti iyo aqoon iyo u-qalmidda jagada.

15.5 Qofka shaqalaha ee ku-simaha ah sida ay dhigeyso faqradda 15.4 waxaa uu jagadaas hayn karaa ugu badnaan lix (6) Bilood in uu Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu ansaxiyo mooyee iyo keliya waqtiga ay dad ku qaadaneyso qorista qof u qalma oo buuxiyoa jagada bannaan.

15.6 Qofka shaqaalaha ah ee ku-sime ahaan u haya jago si waafaqsan faqradda 15.1, 15.2 iyo 15.4, ka dib marka uu ansaxiyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, waxaa uu qaadanayaa mushaar u qalmo darajada iyo heerka jagada uu ku-simaha ku yahay, waase keliya muddada uu ku-simaha ku yahay jagadaas. Qofka shaqaalaha ah ee jago ku-sime ku ah si waafaqsan faqraddan waxaa laga filayaa in uu hawshiisa uga soo baxo heerka looga baahan yahay waxaana lagula xisaabtamayaa natiijooyinka laga doonayo jagada uu ku-simaha ku yahay.

## QAYBTA IV 4: TABABAR IYO HORUMARIN

### 16. Isuduwid uu Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu Sameeyo

16.1 Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo oo kaashanaya wazaarada shaqada iyo shaqaalaha ayaa ka mas'uul ah isuduwidda qorsheyaasha tababaridda iyo kobcinta ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

### 17. Mas'uuliyadda Hay'adda Loo Shaqeeyo

17.1 Madax-waaxeedyada Hay'adda ayaa ka mas'uul ah soo saaridda qorsheyaasha tababarka iyo kobcinta ee waaxdooda; iyo in ay qorsheyaashaas, ay ugu dambeyn 30ka Sebtembar sanad kasta, u soo gudbiyaan Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

17.2 Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Hay'ad Kasta oo Loo Shaqeeyo ayaa ka mas'uul ah isukeenidda qorshayaasha tababarka iyo kobcinta iyo diyaarinta qorshe tababar iyo kobcin oo iskudhafan oo ay leedahay Hay'adda Loo Shaqeeyo iyo u-gudbinta qorshaha ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si uu u soo ansaxiyo.

17.3 Kharashaadka lala xiriiriyo qorshaha tababarka iyo kobcinta waa in lagu daraa miisaaniyad-sanadeedda Hay'ad Kasta oo Loo Shaqeeyo.

### 18. Hadafka laga leeyahay Tababarka iyo Kobcinta

18.1 Qorsheyaasha tababarka iyo kobcinta shaqaalaha rayidka ah ee dowladda, haddii ay yihiin kuwo degaan ama kuwo caalami ahba, waa in ay waafaqsanaadaan baahiyaha

hay’adda waana in diiradda lagu saaraa kobcinta kartida shaqaalaha si ay uga soo baxaan shaqadooda iyo si ay uga qaybqaataan yoolalka iyo ahdaafka natiijooyinka ay higsaneysa Hay’adda Loo Shaqeeyo.

## QAYBTA V 5: SHURUUDAHA SHAQAALEYNTA

### 19. Qiimeynta sanadlaha ah ee shaqada qofka

19.1 Sida uu hawshiisa uga soo baxo qofka ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee heerkiisu ka hooseeyo Agaasime Guud (Xoghayaha Joogtada ah) waa in lagu go’aamiyo wadahadal rasmi ah oo uu la yeesho iyo qiimeyn uu ku sameeyo Maareeyihiisa/heeda waana in ay tani dhacdaa sanadkiiba mar ama sida loogu baahdo. **Xeer-nidaamiyeyaasha** qiimeynta hawsha qofka ee sanadlaha ah waxaa dejinaya Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

### 20. Mushaaraadka iyo gunnooyinka

20.1 Mushaaraadka, gunnooyinka iyo faa’iidooyinka kale ee lagu helayo jagooyinka Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda, iyo sidoo kale kharashaadka safarrada, waxaa lagu sheegayaa **Xeer-nidaamiyeyaal** uu soo saaro Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, si ku saleysan talo soo jeedinta Wasaaradda Maaliyadda. Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda waxaa ay xaq u leeyihiin in mushaar ay helaan 12 bilood sanadkii.

20.2 Waa in xogaha la xiriira sida shaqada ay u yimaadaan ee dhammaan shaqaalaha ka hooseeya heer Agaasime Guud loo ururiyaa loona gudbiyaa toddobaadle. Mushaaraadka waxaa la bixinayaa keliya haddii lagu qanco xogta soo-xaadirista shaqada ee bishaa. Tilmaamaha/amarrada sida loo xisaabinayo loona bixinayo mushaarka bisha ee uu qofku xaq u yeesho waxaa soo saaraya Wasaaradda Maaliyadda.

20.3 Shaqaalaha looga baahan yahay in ay shaqeeyaan waqti ka badan saacadaha shaqada ee caadiga ah waxaa la siinayaa waqti fasax ah oo loogu magayo waqtiyadaa ay shaqeeyeen. Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa soo saaraya **Xeer-nidaamiyeyaal** lagu oggolaanayo saacadaha shaqo dheeri ah loona bixinayo fasaxa lagu magayo saacadahaa dheeriga ah ee la shaqeeyey.

20.4 Mushaarka bisha waxaa laga jari karaa lacago cashuur ah, fasax muddadiisu aanu qofku lacag qaadan, ama in uu soo celiyo lacag ay ku leedahay Hay’adda Loo Shaqeynayo si waafaqsan **Tilmaamo/amarro** uu soo saarayo Wasiirka Maaliyadda.

20.5 Tirada lacagta wixii gunnooyin ah ama lacago gaar ah oo la bixinayo ah ee laga yaabo in la siiyo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, kuwaas oo ay ka mid yihiin lacagaha **Xaqul Ciidka** ah, waxaa sanad walba go’aaminaya Golaha Wasiirrada iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, iyaga oo ku xisaabtamaya kheyraadka/lacagaha ku jira miisaaniyadda. Waa in aan la bixin gunno ama lacag kale oo gaar ah oo aysan oggolaan Golaha Wasiirrada.

20.6 Guddiga ayaa soo saaraya **Xeer-nidaamiyeyaal** ku saabsan sida faa'iidooyinka aan lacagta ahayn ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo ay ka mid yihiin isticmaalka baabuurta, telefoonnada gacanta iyo kombuyutarrada. Tas-hiilaadka iyo qalabka la siiyo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si ay hawshooda u gutaan waxaa ay ahaanayaan hanti uu leeyahay maamulka Dowlad goboleedka, waana in la hayaa iyaga oo xaaladdoodu wanaagsan tahay, waana in loo soo celiyaa Hay'adda Loo Shaqeynayo haddii Qofka Shaqaalaha ah uu ka baxo shaqaalenimada sababtu waxa ay doonto ha ahaatee ama loo beddelo jago kale.

20.7 Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda shaqaalanimadooda ma laha gunno hawlgab ama caymin caafimaad iyo faa'iido kale marka laga reebo sida goor dambe lagu soo saari doono sharci gaar ah.

**21. Fasaxyada**

21.1 <u>Fasaxyada Guud ama Kuwa Qaran</u>

b) Qofka shaqaalaha ah waa in uu xaq u lahaadaa fasax uu lacagtiisa oo buuxda uu qaadanayo waqtiyada fasaxyada guud ee rasmiga ah. Taariikhaha fasaxyada guud iyo tirada maalmaha fasaxyada xaqa loo leeyahay munaasabad kasta waa in uu soo saaraa Golaha Wasiirrada ka hor inta uusan sanadka bilaaban.

t) Haddii shaqaalaha looga baahdo in ay shaqeeyaan maalin fasax guud uu jiro, waxaa ay heli doonaan waqti fasax ah oo loogu magayo kaas ay shaqeeyeen.

j) Haddii maalin fasax guud ah ay ku soo beeganto maalin Jimce ah, Shaqaalaha waxaa la fasaxayaa maalinta xigta.

x) Haddii qof shaqaale ah uu xanuunsado maalin fasax guud uu jiro, lama siinayo maalmo dheeri ah oo fasax ah.

21.2 <u>Fasax-sanadeedka</u>

b) Shaqaale kasta waxaa uu xaq u leeyahay laba (2) maalmood oo shaqo oo fasaxa sanadka ah bil kasta oo uu shaqaale yahay. Fasax-sanadeedka waxaa la qaadan karaa oo keliya marka ay dhammaato muddada tijaabada ah.

t) Fasax waa la qaadan karaa inta uu doono ha la ekaadee iyo maalmaha la doonaba ha ahaadee haddii horey loogala heshiiyo Maareeyaha, iyo haddii uu waafaqsan yahay shuruudaha ay u dejisey Hay'adda Loo Shaqeynayo. Codsi fasax waa in qoraal lagu soo gudbiyaa ugu yaraan hal toddobaad ka hor.

j) Hay'adda Loo Shaqeeyo ayaa hayneysa xogta la xiriirta fasaxa u ururey qofka Shaqaalaha ah. Fasax-sanadeedka u ururey qofka shaqaalaha ah ee aan lagu qaadan laba sano gudahood waa la tirtirayaa.

21.3 <u>Fasaxyada hooyada dhashey iyo fasaxa aabbaha loo dhaley</u>

b)Shaqaalaha Haweenka ah waxaa ay xaq u leeyihiin **14 toddobaad oo isku xiga** oo ah fasaxa hooyada oo ay qaadaneyso mushaarka iyo xuquuqda kale ee ay leedahay oo dhammeystiran. Shaqaalaha Haweenka ah ee haysta Qandaraas

Muddo Go’an si waafaqsan Qodobka 22aadee Xeerkan waxaa ay leeyihiin xuquuqdaan.

t) Haddii ilmaha yari uu dhinto ka hor inta aanu dhalan ama ka dib marka uu dhasho, Qofta Shaqaalaha ah ee dheddigga ah waxaa ay xaq u leedahay fasax caafimaad iyo fasax kale oo naxariis oo dheeri ah sida ay dhigeyso faqradda 21.4a) ee Xeerkan.

j) Shaqaale lab ah waxaa uu xaq u leeyaahay lix (6) maalmood oo fasax aabbaha loo dhaley ah marka uu ilmo u dhasho.

x) Fasaxyada hooyada dhashey iyo aabbaha loo dhaley waxaa lagu darsan karaa fasaxyada noocyada kale ah.

kh) Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa soo saaraya habraacyo faahfaahsan oo lagu bixinayo fasaxa hooyada dhashey iyo aabbaha loo dhaley.

21.4 Fasaxyada jirrada/caafimaadka iyo fasaxa naxariista

b) Qof shaqaale ah waxaa la siin karaa fasax ilaa 12 maalmood oo la shaqeeyo ah sanadkii kaas oo ah fasax dheeri ah oo qofka uu mushaarkiisu qaato marka ay jiraan sababahaan soo socda:

1-Xannuun uu qabo qofka Shaqaalaha ah, oo uu xaqiijiyey hawl-wadeen caafimaad.

2-Geeri ama xannuun ku yimaada xubin ka tirsan qoyskiisa gaarka ah (waalid, xaas, ilmo), oo uu xaqiijiyey hawl-wadeen caafimaad.

3-Guursashada qofka shaqaalaha ah ama guursashada carruurta qofka shaqaalaha ah.

4-Sababo kale oo naxariiseed oo lagala heshiiyo Madaxa Hay’adda Loo Shaqeeyo.

t) Dokumentiyo xaqiijinaya dhacdada lagu bixiyey fasaxa waa in Hay’adda Loo Shaqeynayo lagu gaarsiiyaa laba toddobaad gudahooda marka ay dhacdadu dhacdo haddii kale fasaxaas waa in laga jaraa fasaxa qofku lacag qaadan ama fasax-sanadeedka qofka u ururey.

21.5 Fasax aan lacag la qaadan

b) Fasax aan lacag la qaadan waxaa lagu bixin karaa oo keliya marka ay jiraan xaalado gaar ah oo ka dib codsi qoraal ah uu qofka shaqaalaha ah u soo gudbiyo Hay’adda Loo shaqeynayo.

t) Maqnaanshaha aan loo qiil sameyn waa in loola dhaqma sidii fasax aan lacag la qaadan ama laga jaro fasax-sanadeedka uu qofkaa xaqa u leeyahay.

## 22. Jagooyinka Shaqaalaha Rayidka ah ee Bulshada ee ay maaliyaddoodu bixiyaan deeq-bixiyeyaal

22.1 Marka dowladdu ay deeq-bixiye ka codsato in uu maaliyad-siiyo jago gaar ah oo ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, oo uu deeq-bixiyuhuna oggolaado codsigaa, waa in lagu saleeyaa mabaa'diidan soo socda.

22.2 Shaqaalaha haya jagooyinka uu deeq-bixiye maaliyaddoodu bixiyo waxa ay marayaan shuruudaha shaqaalenimada ee uu dhigayo Xeerkan oo ay ku jiraan Waajibaadka iyo Mas'uuliyadaha Qodobka 8aad) iyo Waxyaabaha ka mamnuuca ah (Qodobka 9aad) marka laga reebo in qandaraaska shaqaaleynimadu uu ahaanayo Muddo cayiman oo ugu yaraan 12 bilood ah. Qandaraaskan waqtiga ayaa loo dheereyn karaa oo waxaa lagu dari karaa muddooyin middiiba ay 12 bilood tahay haddii ay oggolaadaan Hay'adda Loo Shaqeynayo iyo deeq-bixiyaha ka dib marka ay dib u eegaan sida uu qofkaa Shaqaalaha ah uga soo baxay hawshiisa iyo sida loogu baahan yahay in jagadaas loo helo maaliyad deeq-bixiye.

22.3 Jago kasta oo uu maaliyad siinayo deeq-bixiye waxaa ay lahaaneysaa lambar jago iyo tilmaan shaqo, oo uu ansaxiyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, taas oo cayimeysa waajibaadka laga doonayo, shuruudaha aqooneed, xirfadlenimo iyo waayo-aragnimo ee loogu baahan yahay jagada, iyo darajada mushaar ee u habboon jagada.Jagooyinka uu ka hadlayo Qodobkan waa in shaqaale loo qoro iyada oo loo marayo geeddi-socod shaqo-qoris oo ku dhisan aqoonta iyo kartida qofka waana in uu Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah u maareeyo si waafaqsan Qodobka 11aad ee Xeerkan.

22.4 Geeddi-socodka caadiga ah ee shaqo-qorista loo tartamo ee uu tilmaamayo Xeerkan ayaa loo raacayaa buuxinta jagada. Deeq-bixiyaha u habboon ayaa ka-qaybgeli kara geeddi-socodka shaqo-qorista iyo dib-u-eegista hawl-qabadka Qofka Shaqaalaha ah.

22.5 Jagada uu maalgelinayo deeq-bixiyaha waxaa marka hore lagu shaacinayaa heerka mushaarka aasaasiga ah ee jagooyinka darajada lagu cayimo tilmaanta shaqada ee la ansaxiyey. Haseyeeshee, haddii ay dhacdo in musharax ku habboon jagada oo leh aqoontii iyo waayo-aragnimadii loo baahnaa aan lagu helin geeddi-socodka shaqaaleynta, jagada dib ayaa loo shaacin karaa iyada oo mushaarkeeda la kordhiyey kaas oo noqonaya mushaarkii loo ansaxiyey jagada oo lagu darey gunno kale oo bille ah oo ay wada go'aaminayaan dowladda iyo deeq-bixiyaha. Gunnada waxaa la siinayaa qofka jagada haya keliya inta jagadaasi uu maaliyaddeeda bixinayo deeq-bixiye.

22.6 Qofka shaqaalaha ah waxaa uu hoos tegayaa oo uu warbixintiisa u gudbinayaa Maareeyaha loo xulo ee lagu sheegey tilmaanta shaqada.

22.7 Haddii ay dhacdo in ay joogsato maaliyadda uu deeq-bixiye siiyo jagada Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ka mid ah, oo aay dowladu u argto in loo baahan yahay in jagadaas ay sii socoto, Qofka Shaqaalaha ah waxaa la siinayaa fursad ay jagada ku noqoneyso Qandaraas Ay Muddadiisu Furan tahay oo shuruudaha iyo mushaarka caadiga ah ee jagada uu ku qaadanayo. Looma baahna in la mariyo waqti tijaabo ah markan. Haddii Qofka Shaqaalaha ah uu doorto in uusan jagadaas sii haynin waxaa

loo buuxinayaa si waafaqsan geeddi-socodka caadiga ah ee shaqaaleynta ee uu dhigayo sharcigan.

22.8 Qodobkan ma khuseeyo maaliyadda ay bixiyaan deeq-bixiyeyaasha ee soo marta miisaaniyadda mideysan ee Dowlad-goboleedka Hirshabelle ee Soomaaliya taas oo aan ku xirnayn jagooyin gaar ah oo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda Ka Tirsan. Ma khuseyso jagooyinka dibadda ka ah shaqaalaha rasmiga ah ee joogtada ah sida la-taliyeyaasha khubarada ah ee lagu baadi-soocay in ay yihiin qandraaslayaal adeeg xirfadle.

## 23. Beddelaadda shaqaalaha

23.1 Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa loo beddeli karaa jago kale oo isla darajadaas ah oo ka mid ah Hay'adda uu u Shaqeynayo, ama jago kale oo isla darajadaas ah oo ah Hay'ad Loo Shaqeeyo oo kale, iyada oo aan loo marin geeddi-socod soo-xulid tartan ah haddii:

b) ay jirto jago ka bannaan Shaqaalaha oo isla Heerka Darajadiisa ah.

t) qofka Shaqaalaha ah uu buuxiyo shuruudaha waxbarashada, waayo-aragnimada iyo xirfadda loogu baahan yahay jagada.

j) Labada Hay'adood ee Loo Shaqeeyo ay ka heshiiyeen.

x) Beddelaaddu uu ansaxiyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

23.2 Qofka shaqaalaha ah waxaa uu qaadanayaa isla mushaarkiisii ka hor intii aan la beddelin uu qaadan jirey.

23.3 Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in uu ansaxiyaa beddelaad jagooyinka dhexdooda ah waana in uu hayaa xogta kala beddelka shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.asaga oo la socodsiinaya wasaaradda shaqada iyo shaqaalaha

## 24. Dalacsiinta

24.1 Qofka Shaqaala Rayid ah oo Dowladeed ah waxaa loo dalacsiin karaa darajo ka sarreysa tiisa haddii

b) ay jirto jago ka bannaan shaqaalaha oo heerkeedu ka sarreeyo tiisa,

t) uu buuxiyo shuruudaha aqooneed, waayo-aragnimo iyo xirfadeed ee loogu baahan yahay darajadaas ka sarreysa tiisa, iyo haddii

j) si ku fadhida geeddi-socod xulasho oo lagu tartamayo lagu qiimeeyo in uu yahay musharaxa ugu wanaagsan ee buuxin kara jagadaas.

24.2 Guddiga waa in uu ansaxiyaa dalacsiinta jagooyinka waana in uu hayaa diiwaanka dalacaadaha shaqaalah rayidka ah ee dowladda.

24.3 Marka la dalacsiiyaba Qofka Shaqaalaha ah waxaa uu xaq u yeelanayaa mushaarka aasaasiga ah ee ugu hooseeya ee u habboon Heerka Darajada jagada cusub.

## 25. Hawlgab

25.1 Shaqaaluhu waxaa ay shaqada hawlgab ka noqonayaan marka ay da'doodu gaarto 65 sano. Guddiga ayaa Shaqaalaha siinaya muddo hal bil ah oo uu ku ogeysiinayo in uu dhammaanayo qandaraaska shaqaalenimadooda da'diisa daraaddeed.

25.2 Shaqaalaha waxaa ay Guddiga ka codsan karaan in uu u oggolaado in ay goor hore hawlgab uga qaataan shaqada sababo caafimaad-xumo daraaddood. Codsiga waa in ay la socotaa warbixin dhakhtar caafimaad oo kaabeysa. Guddiga waxaa uu codsan karaa baaris caafimaad oo lagu hubsanayo warbixinta.

25.3 Shaqaalaha hawlgabka u noqda da' ama xannuun daraaddood waxaa ay xaq u lahaanayaan lacag liil-tir ah oo ah mushaarka aasaasiga ah ee hal bil sanad kasta oo ay soo shaqeeyeen marka ay qaadanayeen hawlgabka. Qiimaha fasaxa sanadka ee ay xaqa u lahaayeen ee aaney qaadan ayaa sidoo kale la bixin doonaa.

25.4 Haddii Qof Shaqaale ah uu dhinto isaga oo shaqaale ah, qoyskiisa ama qoyskeeda (waalidiinta, xaaska ama carruurta ku tiirsan) waxaa ay xaq u lahaanayaan in la siiyo lacagta liiltirka ah iyo wixii uga harey lacagta lagu beddesho fasaxii uu lahaa ee aanu qaadan Qofka Shaqaalaha ah.

## 26. Is-casilaad

26.1 Qofka shaqaalaha ahi waxaa uu ogeysiis qoraal ah oo hal bil ah ku bixinayaa rabitaankiisa ah in uu iska casilo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Qofka shaqaalaha ah ee is-casila xaq uma laha lacagta liiltirka ah. Qiimaha fasax-sanadeedka aan la qaadanse waa la siinayaa.

26.2 Qof horey uga tirsanaa Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda oo is-casiley waxaa uu xaq u leeyahay in uu dib ugu soo biiro Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda haddii uu soo codsado loona qaato jago bannaan isaga oo u soo maraya geeddi-socodka caadiga ah shaqo-qorista ku dhisan tartanka. Shuruudaha muddada tijaabada iyo xaaladaha mushaarka waxaa ay ahaanayaan kuwa lagu dhaqo qofka aan horey ugu soo shaqeyn Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

## 27. Shaqo-ka-joojinta (*Redundancies*)

27.1 Haddii jago ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda aan loo sii baahneyn is-beddel ku yimid hawlaha Hay'adda Loo Shaqeeyo daraaddii ama dhacdo kale oo sababta in la xiro xafiis ama barnaamij, qofka haya jagada waxaa la siinayaa hal bil oo lagu ogeysiinayo in la joojinayo qandaraaskiisa.

27.2 Shaqaalaha la ogeysiiyey in shaqada laga joojinayo waxaa ay soo codsan karaan in loo beddelo jago kale oo ka bannaan Shaqaalaha Rayidka ah ee dowladda, oo isla Heerkaa Darajo ah, si waafaqsan shuruudaha Qodoboka 22aad ee Xeerkan.

27.3 Shaqaalaha shaqada laga joojiyey ee aan u habbooneyn in loo beddelo jago kale waxaa ay xaq u leeyihiin lacag liiltir ah oo ah hal bil mushaarkeed sanad kasta oo ay soo shaqeeyeen, iyo qiimaha fasax-sanadeedka aaney horey u qaadan.

# QAYBTA 6: ANSHAX-MARIN IYO RAFCAAN

## 28. Anshax-xumo

28.1 Ku xadgudbidda qodobbada xeerkan ee Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in loo arkaa dembi anshax-xumo ah. Anshax-xumada waxaa ka mid ah arrimahan soo socda laakiin kuma koobna kuwaan oo keliya:

b) Shaqada oo laga maqnaado iyada oo aan fasax qoraal ah laga haysan Hay'adda Loo Shaqeeyo ama aan la haysan qiil caqligal ah;

t) Shaqada oo laga soo daaho;

j) Goobta shaqada oo laga maqnaado saacadaha shaqada iyada oo aan fasax loo helin;

x) In si lagu qanci karo uu qofka Shaqaalaha ahi uga soo bixi waayo waajib laga sugayey;

kh) Qofka oo waajibaadkiisa si hufan u gudan waaya taasna ay ka dhalatey isticmaalidda aalkolo (khamri) ama maandooriye;

d) Isticmaalidda, iyada oo aan oggolaansho looga helin Hay'adda Loo Shaqeeyo, hanti ama tas-hiilaad ay leedahay Hay'adda Loo Shaqeeyo iyada oo loo adeegsanayo ujeedddooyin aan xiriir la lahayn waajibaadka rasmiga ah;

r) Inuu galo shaqo ka baxsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyada oo aan oggolaansho laga helin Hay'adda uu u Shaqeeyo;

s) Amar-diiddo ama caasigarow ama ku kicidda fal kasta oo fallaaganimo ah;

sh) In uu si aan habbooneyn uga faa'iideysto jagada uu ka hayo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda;

dh) Ku-kicid ama iska indho-tirid hab-dhaqanno tuuganimo, khayaamo ama musuqmaasuq ah;

c) Ku-kicid ama iska indho-tirid Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ku keeneysa sharaf-dhac;

g) Bixinta macluumaad shakhsi ah ama sir ah oo uu heley intii uu ka tirsanaa Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda;

f) Dayacaad ku keeneysa in ay wax uga lumaan Hay'adda uu u Shaqeeyo;

k) Dayacaad weyn oo uu dayaco ka soo bixidda waajibaadkiisa;

l) Weydiisashada ama aqbalidda abaalmarin maaliyadeed ama haddiyado aan loo fasaxin oo uu ku qaato qabashada hawlaha Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

28.2 Shaqaalaha waxaa uu waajib ka saaran yahay in ay soo sheegaan wixii anshax-xumo ah ee ay ogaadaan. Hay'adda Loo Shaqeeyo, Guddiga, saraakiisha la doortey, iyo

Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee kale waxaa ku waajib ah ilaalinta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee soo sheega fal anshax-xumo ah.

28.3 Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa soo saari doona **Xeer-nidaamiyeyaal** ay tahay in la raaco marka wax laga qabanayo anshax-xumo. Shaqaalaha waxaa ay xaq u lahaanayaan in ay is-difaacaan marka la tixgelinayo eedeymaha anshax-xumada ee iyaga laga soo gudbiyo.

## 29. Ciqaabaha Ka Dhalanaya Anshax-xumada

29.1 Ciqaabaha ka dhalan kara anshax-xumo waxaa ka mid ah kuwaan soo socda:

b) Digniin af ah

1- Digniiin af ah ayaa laga soo saarayaa haddii ay tahay anshax-xumo yar oo tii ugu horreyseyna uu qofku galey oo aaney wax dhibaato ah ku keenin hawlaha Hay'adda Loo Shaqeeyo ama maamulka. Digniin af ah ayaa waxaa ka soo saari kara Maareeyaha.

t) Digniin qoraal ah

1- Digniin qoraal ah ayaa laga soo saarayaa anshax-xumo meel dhexaad ah oo aan dhibaato culus ku keenin Hay'adda Loo Shaqeynayo. Digniin qoraal ah ayaa waxaa ka soo saari karaa Maareeyaha. Waraaq digniin ah waxaa ay jireysaa muddo 12 bilood ah.

2- Haddii ay dhacdo in uu Qofka Shaqaalaha ahi uu mar kale ku kaco anshax-xumadii waxaa laga soo saari karaa digniin qoraal ah oo labaad.

j) Shaqo ka hakin

1- Shaqo-ka-hakin waa muddo gaaban oo la hakiyo qandaraaska shaqada, iyada oo qofka la siineyo mushaar iyo gunnooyin kale, ugu badnaan muddo laba bilood ah. Qofka Shaqaalaha ah ayaa shaqada laga hakin karaa inta ay Hay'adda Loo Shaqeynayo baareyso eedda anshax-xumada.

2-Haddii gebogebada baarista la caddeyn waayo dembigii, Qofka Shaqaalaha ahi waa in la siiyaa dhammaan mushaaraadkii iyo gunnooyinkii muddadii shaqada laga hakiyey.

3-Haddii gebogebada baaritaanka Hay'adda Loo Shaqeynayo ay u aragto in dembiga uu dhacay, arrinta waxaa loo gudbinayaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si ay baaritaan dheeri ah ay ugu sameeyaan.

x) Shaqo-ka-saaris/eryid

1-Qof Shaqaale ah waxaa shaqada looga eryi karaa dembiyo culus sida ku-takrifalid ama maleegidda khayaanno lagu sameeyo maamulka, xatooyada xoolaha dadweyne ama xadgudub kale oo ba'an. Eedeymaha anshax-xumo ba'an waxaa ay Hay'adda Loo Shaqeeyo u gudbineysaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si uu u baaro oo uu shaqadana uga eryi karo.

### 30. Rafcaannada

30.1 Qof shaqaale ah oo aan ku qancin go'aan ay ka qaadatey Hay'ad Loo Shaqeeyo kaas oo la xiriira dhinac ka mid ah shaqaalenimadooda, ama amar uu siiyey Maareeye ama Hay'ad Loo Shaqeeyo, waxaa uu Guddiga ka codsan karaa in uu arrinta baaro. Xubnaha Guddiga ayaa sameynaya Guddi-hoosaad ka madax-bannaan oo u qaabilsan Rafcaannada si ay u dib ugu eegaan dacwadaha ayna u siiyaan fikir ayidaya doodda Hay'adda Loo Shaqeeyo ama mid ayidaya doodda Qofka Shaqaalaha ah. Haddii ay ku habboon tahay Guddigu waxaa uu cayimayaa tallaabada ay tahay in ay qaaddo Hay'adda Loo Shaqeeyo si ay wax uga qabato cabashada..

## QAYBTA 7: MIISAANIYADDA NAKH-SHADDA QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADEED, DHISIDDEEDA IYO SHAQAALE U SAMEYNTEEDA

### 31. Qaabeynta Hay'adda

31.1 Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo ayaa ka mas'uul ah hubinta in hay'adda loo qaabeeyo qaab hubinaya taabogalnimada Wasaaradda/Hay'adda.

31.2 Wadarta tirada jagooyinka qaab-dhismeedka hay'adda ee maaliyad ka helaya Miisaaniyadda waa in ay noqotaa tirada ay ka kooban yihiin shaqaalaha Hay'adda Loo Shaqeeyo.

31.3 Qaab-dhismeedka hay'adeed ee Wasaaradda/Hay'adda oo ay la socdaan tilmaamaha qoran ee shaqada ee jago kasta ee ka tirsan shaqaalaha hay'adda waa in uu ansaxiyaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

### 32. Miisaaaniyad-sanadeedda

32.1 Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo ayaa ka mas'uul ah hubinta in shaqaalaha hay'addu ay u qaabeysan yihiin qaab ka tarjumaya yoolalka iyo ujeeddooyinka hay'adda oo si buuxdana ay ugu jiraan miisaaniyad-sanadeedda.

## QAYBTA 8: QODOBBO KALE

### 33. Xeer-nidaamiyeyaal la soo saari karo si loo fuliyo Xeerkan

33.1 Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ayaa **Xeer-nidaamiyeyaal** iyo **Tilmaamo/Amarro** ka soo saari kara hirgelinta Xeerkan. **Xeer-nidaamiyeyaasha iyo Tilmaamaha** uu soo saaro Guddiga waa ay qaataan Hay'adaha Loo Shaqeeyo marka ay maamulayaan shaqaalahooda. **Xeer-nidaamiyeyaasha** uu soo saaro Guddoomiyaha Guddiga isaga oo ka ambaqaadaya Xeerkan waa in maraan muddo aan ka badneyn toban (10) maalmood oo uu dib-u-eegis ku sameeyo Baarlamaanka taas oo ka bilaabata maalinta uu Guddoomiyaha Guddigu uu horgeeyo Baarlamaanka. Haddii uusan Baarlamaanku go'aan rasmi ah oo uu kaga soo horjeedo (ku diido) ka

soo saarin 10 maalmood ka dib, **xeer-nidaamiyeyaashu** si toos ah ayaa u noqonayaan sharci dhaqangal ah.

34. **Xeer-dhaqan anshaxeed (*Codes of conduct*)**

34.1 Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu soo saari karaa:

b) Xeer Tilmaamaya Anshaxa Hawleed iyo Hab-dhaqan ee dhammaan shaqaalaha rayidka ah ee dowladda; iyo

t) Xeer-dhaqan Anshaxeed la xiriira hawsha gaarka ah ee waax, xafiis ama qayb ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.


34.2 Qofka u hoggaansami waaya Xeer-dhaqan Anshaxeedka lagu soo saaro Faqradda 33.1 waxaa:

b) Marka u-hoggaansamid la'aanta ay tahay dembi ama xil-gudasho la'aan uu tilmaamey sharci kale, lagu xukumi doonaa sida uu dhigayo sharcigaa kale; iyo

t) Marka u-hoggaansamid la'aantu aaney ahayn dembi ama xil-gudasho la'aan uu tilmaamey sharci kale, loo tixgelin doonaa in uu ku kacay anshax-xumo waxaana loo xukumi doonaa si waafaqsan Qaybta 6 ee Xeerkan.

35. **Sarreynta Xeerkan**

35.1 Xitaa haddii uu jiro sharci macne kan ka soo horjeeda dhigaya, haddana qodobbada Xeerkan ayaa ka sarreeya. Xeer kasta oo ka soo horjeeda Xeerkanna wax baa la beddeli si loo waafajiyo qodobbada Xeerkan.




**Mudane Maxamed Cabdi Waare**
**Madaxweynaha Dowlad Goballeed Hirshabelle State ee Soomaaliya**